

Daraasadda Sunta Hawada ee Seattle iyo Tacoma

Waxaan kugu martiqaadeynaa inaad wadaagto fikradaada



WAA MAXAY SUNTA HAWADA?

Sunta hawada waa koox ka badan 400 wasakh oo lagu yaqaan ama looga shakiyo inay sababaan dhibaatooyin caafimaad oo dhowr ah; oo ay ku jiraan kansarka iyo cilladaha dhalashada, iyo sidoo kale dhaawaca sambabada, habdhiska difaaca, iyo habdhiska dareenka. Gobolka Puget Sound, khataraha caafimaad ee ugu weyn ee ka imanaya sunta hawadu waxay ka yimaadaan asal ahaan qaybaha yaryar ee qiiqa naaftada.

MAXAAN BARAN DOONNAA?

Waxaan eegi doonaa isbeddelada heerarka sunta hawada muddo dheer oo ay ku jiraan ilaha qiiqa naaftada, qiiqa alwaax, ethylene oxide (sun hawo oo dhowaan mudnaan la siiyey), iyo qiiqa birta ee aagga warshadaha. Waxaan qiyaasi doonaa halista kansarka ee ka imaan kara sunta hawada.

MAXAY DARAASADDAN MUHIIM U TAHAY?

Daraasadani waxay soo uruurin doontaa xogta tayada hawada oo tayo leh waxayna naga caawineysaa inaan si fiican u fahamno halista caafimaad ee la xiriirta wasakheynta hawada bulshadeena. Warbixinta ugu dambaysa si rasmi ah ayaa loo sii deyn doonaa si ururada kale iyo wakaaladaha u adeega Duwamish Valleyay u heli karaan una isticmaali karaan xogta si loo go'aamiyo halka mudnaanta laga siiyay bulshada.


Daraasadda Sunta Hawada ee Seattle iyo Tacoma

SAMBALAYN AY HAGAYAAN BULSHADA + JADWAL

Waxaan dhammeyn doonaa sannad kormeer oo laba goobood oo ku dhow jid weynaha iyo laba goobood oo warshado ah oo ku yaal Seattle iyo Tacoma, iyo goob la deggan yahay oo ku taal Tacoma oo leh heerarka ugu sarreeya ee qiqa alwaaxda gobolka.

Intaas waxaa sii dheer, waxaa jirta fursad kormeer oo ay bulshada hagayso. Qeybtan daraasadda waxaa ka mid noqon doona xubnaha bulshada inta lagu gudajiro aqoonsiga goobaha ay qusayso ee Duwamish Valley, iyo go'aaminta inta jeer iyo muddada ay kormeerayaan goobaha qaarkood.

Kormeerka sunta ayaa bilaabmi doonta xagaaga/deyrta 2021. Kadib muddada kormeerku dhammaato, markaas kadib waxaan tarjumi doonaa xogta si loo baaro wixii khatar caafimaad ee bulshada ugu imaan kara. Waxaan rajeyneynaa in natiijooyinka ugu dambeeya lagu soo wargaliyo bulshada ka dib marka kormeerka la dhammeeyo, dhammaadka 2022.



GOOBAHA WAXBARASHADA

- Goobta Waxbarashada
- Saldhig Kormeer ee Kale
- PM 2.5 Goob Dayactir
- Bulshada Diirad Saaridda

Dhibcaha Baaritaanka Caddaaladda Deegaanka

- Saamaynta Ugu Yar 20%
- Saamaynta Ugu Badan 20%

WAXAAN KUGU MARTIQAADAYNAAN INAAD WADAAGTO ARAGTIDAADA!

Waxaan rabnaa inaan ku darno fikradaada ku aadan halka laga kormeerayo sunta hawada ee Duwamish Valley. Waxaan siminaar qaban doonaa **Talaado, Ogosto 17keeda** goobtuna waa South Park. Waxaan sidoo kale soo bandhigi doonaa macluumaad ku saabsan sunta hawada, waxaan la wadaagi doonaa natiijooyinka daraasadda oo hordhac ah oo dhowaan la sameeyey, waxaanna maqli doonaa fikirkaaga qiimaha leh.

Halkan iska diiwaangali. www.bit.ly/3eDliOH

Buuxi sahankan si aad u wadaagto fikradaada isla markaana aad u ogaato meelaha aad is leedahay waa in mudnaanta la siiyaa.

Linkiga sahanka. www.pscleanair.gov/DVAirToxics

Fadlan naga la soo xiriir haddii aad wax su'aalo ama walaac ah halkan ej@pscleanair.gov.